

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 25^{AAD}

CADADKA 12^{AAD}

TAARIIKH: 12/23/2025

Lam. 07

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

DEGMOOYINKA CEEL-BUH EE GOBOLKA SANAAG IYO BARAAGAHA-QOL
EE GOBOLKA HAYLAAN EE DOWLADDA PUNTLAND

TUSMADA

Qeybta 1 ^{aad}	<i>Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah Degmooyinka Ceel-buh ee Gobolka Sanaag iyo Baraagaha-qol ee Gobolka Haylaan ee Dowladda Puntland</i>
Qeybta 2 ^{aad}	<i>Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 3 ^{aad}	<i>Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 4 ^{aad}	<i>Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 5 ^{aad}	<i>Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA MADAXWEYNE
KU-XIGEENKA



ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب نائب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE VICE PRESIDENT

Sharci Lr. 07 ee 24-ka December 2025, kuna saabsan ansixinta Degmooyinka Ceel-buh iyo Baraagaha-qol.

Ku-simaha Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 81-aad iyo Xeer Madaxweyne Lr. 06 ee 3-da Sebteembar 2025.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/44/2025, kuna taariikhaysan 04-ta Diseembar, 2025.

Markuu fixgeliyey: Baahidda loo qabo Ansixinta Degmooyinka cusub ee lagu soo kordhiyey Dowladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen **Degmooyinka Ceel-buh ee Gobolka Sanaag iyo Baraagaha-qol ee Gobolka Haylaan ee Dowladda Puntland**

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinaayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

Qodobka 3-aad

Dhaqangal, Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

Ilyas Osman Lugatoor

K/S Madaxweynaha ahna Madaxweyne Ku-Xigeenka Dowladda Puntland

Tell: 0906777711

E-mail. vp@plstate.so

website: www.plstate.so

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA



ولاية بونت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILLADA

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:- XGGW/DPL/44/2025 Garoowe, Khamiis, Taariikh:- 04/12/2025

Ku:-Madaxweynaha Dawladda Puntland

Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Degmooyinka Ceel-buh iyo Baraagaha-qol

Mudane Madaxweyne,

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -

MARKUU ARKAY:-

Qodobka 64-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Ku-simaha Madaxweynaha Ref: XMWK/DPS/252/2025 ee Dec 02, 2025, kuna saabsan Ansixinta Degmooyinka Ceel-buh iyo Baraagaha-qol ee Gobollada Sanaag iyo Haylaan.

MARKUU TIX-GELIYEEY: -

Baahida loo qabo Ansixinta Degmooyinka cusub ee lagu soo kordhiyey Puntland iyo muhiimadda ay leedahay in adeegga dawladnimada la gaarsiiyo shacabka.

MARKUU ARKAY: -

Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 57-aad fadhigiisii 20-aad ee 04.12.2025 cod gacan taag ah ku ansixiyeen Degmooyinka Ceel-buh iyo Baraagaha-qol. Guntanka Fadhiga oo ahaa (44) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (44) Mudane, Diidmo iyo aamustoona majirin majirin.

WUXUU GUDDOOMIYEEY: -

Ansixinta Degmooyinka Ceel-buh ee Gobolka Sanaag iyo Baraagaha-qol ee Gobolka Haylaan ee Puntland.

Wada Shaqeyn Wacan

Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

